Xeerka Daynta iyo Aruurinta Qarashka ee Boston Children's Hospital

Liiska Mawduucyada

I. Bayaannada Xeerka Guud

II. Qeexitaannada

III. Qaybaha Adeegyada

IV. Caawimaada Helitaanka Caawimaad dhaqaale
- A. Ogaysiiska Dadwaynaha ee helitanaka Caawimaad dhaqaale
- B. Ogaysiiska Shaqsiga ah ee helitanaka Caawimaad dhaqaale

V. Dib u dhigista/Diidmada Adeegyada

VI. Habraacyada loo maraayo Aruurina Xogta Dhaqaalaha ee Bukaanka/Masuulka bukaanka
- A. La wareegida Xogta
- B. Baraha Xog Aruurinta
- C. Cadaynta Xogta Taageerada Bukaanka
- D. Shaacinta Xogta/Bixinta Gunnooyinka
- E. Xaqiijinta Masuuliyada Qarashka Adeegyada aan ku jirin Caawimaada

VII. Qarash bixinta
- A. Koontada lacag shubida
- B. Qiima dhimisyada
- C. Qorshayaasha Qarash Bixinta
- D. Awooda Ansixinta Wax ka badalka Koontada

VIII. Dalabka biilka, Talaabooyinka Lacag Qaadista iyo Go'aaminta Daynta Xumaatay
- A. Go'aaminada Adeeggyada Bukaanku u Qalmo
- B. Bukaanada/Masuuliyiinta bukaanka ee Laga Reebay in Laga Aruursho Qarashka
- C. Dalabka Hore ee biilka
- D. Dabagalka Shaqada Dayn Aruurinta
- E. Boostada Lasoo Ceshahay
- F. Dalaafka Dhaqaale
- G. Go'aaminta Daynta Xumaatay
- H. Ka dalbashada Biilka Daynta Xumaatay ee degdega ah Health Safety Net
- I. Shuruuda Ogolaanshaha Daynta Xumaatay
- J. Dadaalada Dayn Aruurinta ee aan Caadiga ahayn iyo Fulinta Sharciga ah
- K. Dukumiintiyada
- L. Shilka Gaariyaasha

IX. Lifaaqyada Xaquuqaha iyo Waajibaadka saaran Bukaanka: Bandhigyada Qasabka ah, Sida Gaarka ah loo Asteeyay

I. Bayaannada Xeerka Guud

Asagoo adeeg dabiici ah siiya carruurta ku dhaqan Boston, New England iyo deegaano kasii fogfog, Boston Children's Hospital ("Isbitaalka") wuxuu markasta ku dadaalaayay inuu adeeg siiyo carruurta u baahan daryeelka, ayadoon laga eegayn awoodooda dhiibista qarashka. Sanad kasta, waxaad ku mahadsan taageerada uu Isbitaalku ka helo bulshada iyo talaabada sida fiican looga fakaray ee Gudigga Agaasimayaasha, Isbitaalka iyo dhakhaatiirtiisu waxay malaayiin doolar oo Daryeel Deeq ah u fidiyaan carruurta iyo qoysaska.

Isbitaalku wuxuu leeyahay dadaal aad u xoog badan oo ku aadan xaqiijinta in carruurtu ay helaan caymis caafimaad mar kasta oo suuragal ah. La taliyaasha dhaqaalaha ee Isbitaalka ayaa diyaar u ah inay ka jawaabaan su'aalaha qoyska ee la xariira caymiska dawlada ee ay heli karaan carruurta aan lahayn caymiska, iyo inuu qoysaska ka caawiyo gudbinta codsiyada muhiimka ah.

Isbitaalku wuxuu qiimeeyaa baahiyaha caafimaadka ee bukaan kasta iyo xaalada dhaqaale ee qoyska, wuxuuna iskudayaa inuu noqdo mid deeqsi ah oo xaalada la jaan qaada sida ugu macquulsan dhammaan carruurta codsanaaya adeegyada. Si loo joogteeyo awooda Isbitaalka ee ka jawaabida baahida dhabta ah, talaabooyinka xasaasiga ah laakiin joogtada ah ee lacag aruurinta ayaa lagu sameeyaa bukaannada iyo qoysaskooda. Xeerarka iyo habraacyada lagu dajiyay dukumiintigaan ayaa lagu dajiyay dadaal lagu xaqiijinaayo in talaabooyinka iyo habraacyada dalabka qarashka iyo aruurinta lacagta laga dhigo kuwo macquul ah oo si tartiib ah loo fuliyo. Xeerka Daynta iyo Lacag Aruurinta ayaa qabanaaya dhammaan xarumaha Boston Children's Hospital ee ku shaqeeya ruqsada Isbitaalka.

Isbitaalku wuxuu sidoo kale sameeyaa dadaal kasta si uu u noqdo mid fursado badan baxsha kana jawaabaaya xaaladaha shaqsiga ah. Taas badalkeed, waxaa laga rajaynayaa qoysaska inay qadariyaan waajibaadkooda dhaqaale si Isbitaalku u awoodo bixinta daryeelka carruurtaas xaaladahooda nololeed ay adag yihiin.

Ugu danbayntii, Isbitaalku cidna uma takooraayo sababo la xariira isir, midab, wadanka qofku kasoo Jeedo, muwaadinimada, soo galootinimada, diinta, caqiidada, jinsiga, dookha galmada, aqoonsiga Jinsiga, da'da, ama naafada markuu fulinaayo xeerarkiisa ama dhaqan galinta xeerarka la xariira aruurnta iyo cadaynta macluumaadka dhaqaalaha, lacagaha lasoo shubo ee ka hor diiwaan galinta iyo daawayn, qorshayaasha qarash Bixinta, diiwaan galinada dib loo dhigay ama la diiday, ama aqoonsiga Bukaanka Danyarta ah sida uu go'aansho Xafiiska Medicaid, go'aaminta in bukaan uu yahay danyar, ama dalabka lacagta iyo talaabooyinka qarash aruurinta.

Xeerka Daynta iyo Qarash Aruurinta si loo hubiyo ku dhaqanka (1) Xeerka U qalmida Adeegyada ee Health Safety Net 101 CMR 613.00; Shuruudaha daynta Xumaata ee Xarumaha Medicare iyo Adeegyada Medicaid (42 CFR 413.89); iyo (3) Buug Gacmeedka Qarash Celinta Dhakhtarka Medicare (Qaybta 1, Cutubka 3).

II. Qeexitaannada

Daryeelka Deeqda ah: Qarashaadka Isbitaalka ama Xarunta Caafimaadka Bulshada ee adeegyada caafimaad ahaan Muhiimka ah ee la siiyay bukaanada danyarta ah ee aan u qalmin qarashka ay bixiso Health Safety Net Trust Fund iyo ilaha kale ee qarashka baxsha ee dawlada ama gaarka loo leeyahay. sbitaalka ayaa sidoo kale leh barnaamijyada Daryeelka Deeqda ah oo gaar ah laguna cadeeyay xeerarka uu hayo Madaxa Waaxda Dhaqaalaha.

Adeegyada U qalma: Qarashaadka Isbitaalka ama Xarunta Caafimaadka Bulshada ee u qalma qarashka ay bxisio haayada Health Safety Net Trust Fund ee waafaqsan xeerarka ay maamusho Commonwealth of Massachusetts.

Xaalada Caafimaad ee Degdega ah: xaalad caafimaad, mid jireed ama mid dhimirka ah, oo astaamaheedu daliil u yihiin inay aad u daran tahay, ayna ku jiraan xanuun daran, taasoo keenaysa in haddii aan degdeg gurmad caafimaad loogu samayn qofka ay keeni karto sida uu cadeeyo qof aqoon caafimaad u leh xaalada in ay galinayso caafimaadka qofka ama qof kale khatar aad u wayn, naafo wayn oo gaarta shaqada jirkiisa ama naafada daran ee unug ka mid ah jirka ama qayb ama, marka ay tahay haweeneey uur leh, sida lagu qeexay qaybta 1867(e)(1)(B) ee Sharciga Social Security, 42 U.S.C. § 1395dd(e)(1)(B).

Adeegyada Degdega ah: Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah ee la siiyo qof qaba xaalad caafimaad oo degdeg ah.

Bukaan Danyar Ah: Waa qof buuxsha shardiga go'aaminta in qofku yahay Bukaan Danyar Ah ee lagu cadeeyay xeerarka Health Safety Net ee ay maamusho Commonwealth of Massachusetts. Si loogu aqoonsado Bukaan Danyar ah, qofku waa inuu noqdaa qof dagan aaga Commonwealth uuna soo gudbiyaa dakhliga qoyska oo le'eg ama ka yar 400% Heerka Fahriga ee Federaalka (Federal Poverty Level, FPL), waana inuusan ka qornayn MassHealth Standard ama Caawimaada Qoyska ee MassHealth/barnaamijyada Caymiska Tooska ah; waa inaan loo aqoonsan qof u qalma MassHealth oo ku fashilmay inuu iska qoro; waana inuusan haysan MassHealth ama aan la joojin diiwana galintiisa Commonwealth Care sabab la xariirta inuu bixin waayay lacagaha joogtada ah.

Dhibaatada Dhaqaale: Waa qayb ka mid ah u qalmida caymiska ee qarashaadka qaar oo ay bixiso Health Safety Net Trust Fund, oo la siiyo bukaannada/qoysaska qarashaadkooda caafimaadka ee loo ogolyahay ay ka bateen dakhliga qoyska taasoo keentay in bukaanka/qoysku uusan awoodin dhiibista qarashka Adeegyada uu U qalmo (sida ku cad xeerarka). Shuruudaha iyo xeerarka u qalmida Dhibaatada Dhaqaale iyo qarashaadka ay bixiso Health Safety Net Trust Fund ee ku aadan adeegyada la siiyay bukaannada u qalma Dhibaatada Dhaqaale waxaa lagu qeexaa sharciyada ay maamusho Commonwealth of Massachusetts.

Daryeelka Degdega ah: Adeegyada Caafimaad ahaan Muhiimka ah ee uu baxsho Isbitaalka ama xarunta caafimaadka bulshada kadib marka xaalad caafimaad oo degdeg ah timaado, hadday tahay mid jireed ama mid dhimirka ah, taasoo leh astaamo aad u daran (oo uu ku jiro xanuun daran) kaasoo qof caafimaad yaqaana aaminsan yahay in haddii aan daryeel caafimaad oo degdeg ah la siin 24 saacadood gudahood la filaayo inay keento: dhibaataynta caafimaadka qofka; naafaynta shaqada jirka, ama naafaynta unug kasta oo ama qayb jir kamid ah. Adeegyada daryeelka degdega ah ayaa la siiyaa xaaladaha aan ahayn kuwo nafta khatar ku ah aana keenayn khatar wayn oo waxyeelo u gaysan karta caafimaadka shaqsiga. Adeegyada daryeelka degdega ah kuma jiraan daryeelka ikhtiyaariga ah ama aasaasiga ah.

III. Qaybaha Adeegyada

Qofka ayaa iskiis u imaan kara, la keeni karaa, si loo siiyo daawayn aan markii hore loo balamin Waaxda Xaaladaha Degdega ah ee Isbitaalka ama goobaha kale ee daryeelka caafimaadka Isbitaalka lagu baxsho. Bukaan kasta oo u yimaada adeegyada degdega ah waa la baarayaa ayadoon laga eegayn caymiska caafimaad ee bukaanka ama awoodiisa dhaqaale, si waafaqsan Sharciga Daawaynta Xaalada Degdega ah iyo Shaqaalaha ee Federaalka (Emergency Treatment and Labor Act, EMTALA). Kadib marka adeegyo la siiyo bukaan yaala Waaxda Xaaladaha Degdega ah, dhakhtarka ku daawaynaaya Waaxda Xaaladaha Degdega ah ayaa qeexaaya in adeegyadu yhiin Adeegyada Degdega ah ama Daryeel Degdeg ah (si waafaqsan qeexitaanka kor lagu sheegay), ama daryeel aan Degdeg ahayn.

Adeegyada ikhtiyaariga ah iyo adeegyada loo balansho bukaanka ayaa ah Daryeel aan Degdeg ahayn, sidaas awgeedna maaha midkoodna Adeegyada Degdega ah walaa Daryeel Daryeelka Degdega ah, ayadoon laga eegayn meesha adeegga lagu baxshay. Qaybahaan ayuu Isbitaalku u adeegsadaa ujeedooyinka go'aaminta xaalada degdega ah iyo daryeelka degdega ah ee caymiska daynta xumaatay sida ku cad Health Safety Net Fund.

Isbitaalku wuxuu mamnuucayaa talaabooyin kasta kuwaasoo ka hor istaagaaya dadka inay dalbadaan daryeelka caafimaad ahaan degdega ah, sida in laga dalbado bukaanada yaala waaxda xaalada degdega ah inay baxshaan qarashka kahor intaan laga daawayn xaaladaha caafimaad ee degdega ah ama ogolaanshaha talaabooyinka lacag qaadista kuwaasoo carqaladaynaaya bixinta daryeelka, ayadoon la kala saarin xaaladaha, daryeelka degdega ah ee caafimaadka.

IV. Caawimaada Helitaanka Caawimaad dhaqaale

Isbitaalka ayaa siinaaya bukaannada, wakiilada, ama dadka kale ee loo aqoonsado inay bukaanka masuul ka yihiin xog ku saabsan iyo caawimaad laga siinaayo codsashada barnaamijyada caawimaada ee dawlada iyo kuwa kale, ayna ku jiraan MassHealth, Commonwealth Care, Xaalada Bukaanka Danyarta ah sida ku cad sharciyada Health Safety Net , iyo barnaamijyada kale ee dawladu maal galiso, iyo sidoo kale deeqda Isbitaalka ee daryeelka iyo barnaamijyada qiimo dhimista loogu sameeyo bukaannada aan caymiska lahayn. Isbitaalku wuxuu samayn doonaa dadaalada macquulka ah si uu adeegyada turjumaada u siyo bukaannada, wakiilada iyo dhinacyada kale ee masuuliyadu saaran tahay ee aan si fiican ugu hadli karin Ingiriisiga.

Isbitaalku wuxuu ka caawinayaa bukaannada/wakiilada buuxinta codsiyada barnamaijyada dawlada. Bukaannada ama wakiiladu waa inay keenaan dukumiintiyada looga baahan yahay codsiyada noocaas ah. Isbitaalku wax door ah kuma lahan go'aaminta u qalmida barnaamijyadaas, kuwaasoo ay gaarto haayada Commonwealth. Waa masuuliyad saaran bukaanka ama wakiilkiisa inuu u sheego Isbitaalka dhammaan go'aanada caawimaada ee ay gaartay Commonwealth iyo isbadalo kasta oo ku yimid u qalmida bukaanka ee barnaamijyadaas.

A. **Ogaysiiska Dadwaynaha ee helitanaka Caawimaad dhaqaale.** Isbitaalku wuxuu soo dhajinayaa boorar sheegaaya helitaanka caawimaada dhaqaale iyo barnaamijyo kale oo caawimaad dawladeed ah iyo goobaha Isbitaalka ee bukaanada iyo qoysasku ka codsan karaan caawimaada noocaas ah. Boorarkaan waxa alagusoo dhajin doonaa aagaga bukaan jiifka, bukaan socodka iyo qayabaha diiwaan galinta xaaladaha degdega ah/qorista iyo sidoo kale xafiisyada ganacsiga ee caadiyan ay adeegsadaan bukaanadu. Boorarka lasoo dhajinaayo waa 8 ½ x 11 inji balac ahaan, waxaana lagu daabacayaa far cabirkeedu dhan yahay 22, waxaana lagu qorayaa Af Ingiriis iyo Isbaanish.

B. **Ogaysiiska Shaqsiga ah ee helitanaka Caawimaad dhaqaale.** Isbitaalku wuxuu ogaysiis gaar ah ka bixinayaa helitaanka barnaamijyada caawimaada dhaqaalaha, ayna ku jiraan Dhibaatada Dhaqaale, iyo caawimaad ku aadan codsashada barnaamijyadaas, lana siinaayo bukaan kasta oo la filaayo inuu galo qarashaad (marka laga reebo alaabaha ikhtiyaariga ah ee qofku samaysto) oo laga yaabo inuusan si buuxda u bixin cidda sadexad ee qarashka ka dhiibaysa bukaanka. Isbitaalku wuxuu sidoo kale raacinayaa ogaysiis ku aadan helitaanka barnaamijyada Caawimaada Dhaqaalaha, ayna ku jiraan Adeegyada ay U qalmaan Bukaanka Danyarta ah iyo barnaamijyada kale e caawimaada dawlada, iyo helitaanka caawimaad lagaa siinaayo codsashada barnaamijyadaas, biilkeeda koobaad iyo dhammaan talaabooyinka qoran ee lacag aruurinta.

V. Dib u dhigista/Diidmada Adeegyada

Isbitaalku dib uma dhigaayo ama ma diidaayo daawaynta bukaanada u yimaada xaalad degdeg ah ama daryeel degdeg ah ama ah dad qaata gunnooyinka dawlada sida MassHealth, Commonwealth Care, Children's Medical Security Plan, Healthy Start, Health Safety Net, ama barnaamijyada kale ee dawlada, kaliya sabab la xariirta tixgalinnada xaaladiisa dhaqaale.

Isbitaalku wuxuu xaq u leeyahay inuu dib u dhigo ama diido bixinta adeegga aan degdega ahayn, adeegyada aan degdega ahayn ee bukaanka, ayna ku jiraan xaaladaha marka bukaanku/qoysku diido raacida shuruudaha ah in lacag hormaris ah la baxsho ama uu awoodi waayo awood uu ku dhibo qarashka adeegyada si iskiis ah ama ay ka dhiibaan qolo sadexaad uuna diido inuu codsado barnaamijyada dawlada ee uu heli karo, ayna ku jiraan MassHealth iyo Health Safety Net, ama uu diido inuu keeno dukumiintiyada laga doonaayo ee codsiyada noocaas ah.

Markasta oo Isbitaalku uu doorto inuu raaco xaqa uu u leeyahay inuu dib u dhigo ama diido bixinta adeegyadiisa la siin lahaa bukaan, iyo kahor intaan la fulin xaqaas, dhakhtarka loo aqoonsado daaweeyaha bukaanka ayaa lala xariirayaa si loo qiimeeyo dhibaatooyinka caafimaad/daryeel ee ka imaan kara dib u dhigista ama diidista adeegyada, iyo in la aqoonsado ama la ansixiyo dib u dhigista ama diidista adeegyada marka laga eego dhanka caafimaadka.

Mararka loo diido bukaanka adeeggyada, waxaa la bixin doonaa dukumiintiyada sababta loo diiday adeegyada; qiimaynta dhakhtarka bukaanka ee dhibaatooyinka caafimaad ee ka imaan kara dib u dhigista ama diidmada adeegyada iyo aqbalaada lagu saleeyay fikirka caafimaadka; iyo xaqiijinta dhakhtarka ama aqbalaadiisa diidmada adeegyada.

VI. Habraacyada loo maraayo Aruurina Xogta Dhaqaalaha ee Bukaanka/Masuulka bukaanka

A. **La wareegida Xogta:** Kahor intaan la bixin wax daryeel caafimaad ah (marka laga reebo dadka ku jira xaaladaha degdega ah ama heerka daryeelka degdega ah ee adeegga), bukaanka/wakilka waxaa laga doonayaa inuu keeno xog sax ah oo waqtigeedii la keenay oo ku aadan caymiskiisa, xogta meesha uu dagan yahay, isbadalada ku dhacay dakhliga qoyska ama xaaladooda caymiska, iyo xog ku aadan lacag kasta oo uu ka jartay caymisku ama qayb uu bixinaayo kuwaasoo lagu leeyahay marka laga fiirsho jiritaanka caymiskiisa ama waajibaadka lacageed ee barnaamijyada dhaqaalaha. Xogta faahfaahsan waxaa ku jiri doona:

1. Magaca buuxa, ciwaanka, lambarka taleefanka, taariikhda dhalashada, nambarka Social Security (haddii la heli karo), dookhyada caymiska caafmaadka ee hadda jira, muwaadinimada iyo

xogta daganaanshaha, iyo khayraadka dhaqaale ee bukaanka/wakiilka ee loo adeegsan karo bixinta biilkiisa;

2. Magaca buuxa ee wakiilka bukaanka, ciwaankiisa, lambarka taleefanka, taariikhda Dhalashada, nambarada Social security (haddii la heli karo), dookhyada caymiska caafimaadka ee hadda jira, iyo khayraadkiisa dhaqaale ee quseeya oo loo adeegsan karo bixinta qarashaadka bukaanka; iyo

3. Khayraadka kale ee loo adeegsan karo bixinta biilkooda; ayna ku jiraan barnamaijyada kale ee caymiska, xeerarka caymiska ee gaariyaasha ama mulkiilaha guriga haddii daawayntu ku timid shil gaari, barnaamijyada magdhawga shaqaalaha, iyo xeerarka caymiska ardayda, iyo kuwo kale.

Gabi ahaanba waa masuuliyad saaran bukaanka/wakiilka inuu la socdo waqtigeedana ku baxsho qarashka Isbitaalka ee aan wali la dhiibin, ayna ku jiraan lacago kasta oo qayb ahaan laga rabay inuu baxsho, qaybta ugasoo aada caymiska iyo lacagaha caymisku goosto. Bukaanka/wakiilka waxaa kaloo laga doonayaa inuu u sheego midkood shirkadiisa caymiska (hadduu caymis leeyahay) ama wakaalada go'aamisay u qalmida bukaanka ee barnaamijyada caymiska caafimaadka dawlada isbadalo kasta oo ku yimaada dakhliga ama xaalada caymiska ee qoyskiisa.

Bukaanada/wakiilada ayaa laga doonayaa inay u sheegaan barnaamijka dawlada gobalka (tusaale, Xafiiska Medicaid iyo Health Safety Net) xogta la xariirta dacwad kasta oo sharci ah ama sheegasho caymis oo daboolaysa qarashka adeegyada Isbitaalku baxshay. Bukaanka ayaa sidoo kale laga doonayaa inuu qolo sadexaad u fasaxo xaqa hehsiis daboolaaya qarashka adeegyada uu bixinaayo Xafiiska Medicaid iyo Health Safety Net).

Marka aan xogta la bixin xiliga qofka la dhigay isbitaalka ama la qabtay balanta bukaan socodka, dadaalo guulaysta ayaa la samayn doonaa si loo helo xogta loo baahan yahay ayadoo la adeegsanaayo adeegga kahor isbitaal ka bixida/adeegga isbitaalka kadib.

B. **Baraha Xog Aruurinta:** Xogta soo socota ayaa qeexaysa meelaha lagu samayn doono iskudayada macquulka ah si loosoo aruursho xogta iyo cidda soo aruurinaysa:

1. **Marka la Mudaynaayo Isbitaal Dhigsta ama Booqashada Bukaan Socodka:** Xafiiska Dhakhtarka ama xubin ka mid ah shaqaalaha Isbitaalka ee mudaynaaya adeegga ayaa codsanaaya xogta dhaqaalaha.
2. **Inta Lagu Jiro Cadaynta Xogta Bukaanka:** Shaqaalaha Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka, xafiiska dhakhtarka ama shaqaalaha isbitaalka ee cadaynaaya xogta bukaanka kahor intaan adeegga la bixin ayaa codsanaaya xogta dhaqaalaha.
3. **Maalinta Isbitaal dhigista/Waqtiga Adeegga:** Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka, Iskuduwayaasha Daryeelka Bukaanka sida macquulka ah. Marka wax kamid ah xogta dhaqaalaha ee bukaanka/wakiilka su'aal ku jirto, bukaanka/wakiilka ayaa loo gudbin karaa Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka si loo cadeeyo xogta. Hanaankaan wuxuu quseeyaa labadaba adeegyada la mudeeyay iyo kuwa degdega ah (sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah kadib adeegga ama dhigista isbitaalka, si waafaqsan sharciga EMTALA).
4. **Inta lagu jiro Joogista Isbitaalka:** Shaqaalaha Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka ama Iskuduwayaasha Daryeelka Bukaanka.
5. **Marka Isbitaalka Laga Saaraayo:** Shaqaalaha Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka

6. **Kadib Isbitaal Ka bixida/Kadib marka adeegga loo dhameeyo:** Shaqaalaha Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka ama shaqaalaha maaraynta dhaqaalaha ee Isbitaalka.
7. **Adeegyada Degdega ah:** Shaqaalaha diiwaangalinta ee waaxda ayaa waraysanayaa, qaadaaya cadaynaayana dhammaan xogta bukaanka iyo dhaqaalaha ee muhiimka ah sida ugu dhakhsaha badan ee sharciyada EMTALA fasaxayaan. Xogta aan la aruurin xiliga isbitaal dhisgista ayaa lagu aruurin doonaa xariiro iyo waraysiyo lala samaynaayo bukaanka iyo/ama wakiilka dhammaan intuu isbitaalka yaalo, ama marka isbitaalka laga saaro haddii dhammaan iskudayada kale oo dhan fashilmaan. Haddi uu ogolaado bukaanku ama wakiilku, dad kale ayaa lala xariirayaa si loo helo xogta si loo qiimeeyo inuu bukaanku u qalmo qarashka adeegyada la baxshay.
8. **Sax ahaanshaha U qalmida MassHealth:** Marka adeegyada la siiyo bukaan aan caymis lahayn, Shaqaalaha Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka ayaa ka fiirinaaya nidaamka EVS ee MassHealth iyo/ama Nidaamka Xogta Kaydya ee Oonleenka ah ee uu maamulo Xafiiska Fulinta ee Massachusetts u qaabilsan Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (Massachusetts Executive Office of Health and Human Services) haddii uu bukaanku u qalmo ama gudbiyay codsiga uu ku dalbanaayo barnaamijyada MassHealth, Commonwealth Care, ama barnaamijyad akale.

C. Cadaynta Isbitaalka ee Xogta **Dhaqaalaha** Bukaanka: **Shaqaalaha Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka, shaqaalaha maamulka waaxda caafimaadka, ama Iskuduwayaasha Daryeelka Bukaanka ayaa samayn doonaa dadaalo macquul ah oo waxtar leh si ay u cadeeyaan xogta dhaqaalaha ee bukaanku keenay** sida ugu dhakhsaha badan kadib markuu bukaanku baxshay xogta, ilaa laga gaaro waqtiga isbitaalka laga saaraayo ama la dhamaynaayo adeegga bukaan socodka. Haddii aan la xaqiijin karin xogta kahor waqtigaas, Waaxda Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka ama wakiiladeeda ayaa isku dayi kara inay xogta xaqiijiyaan inta lagu jiro hanaanka biilka iyo lacag aruurinta.

Marka laga eego da'da dadka uu isbitaalku u adeego, caadiyan waa waalidka ama masuulka bukaanka qofka keenaaya xogta caymiska iyo dhaqaalaha. Haddii xog dheeraad ah loo baahdo inta Bukaanku ku jiro Isbitaalka, xubnaha Shaqaalaha Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka ama Iskuduwayaasha Daryeelka Bukaanka ayaa la xariiraaya kalkaalisada daryeelka aasaasiga ah ee bukaanka ama wakiilkeeda si fasax loga qaato la xaririda bukaanka ama qoyska bukaanka.

Dadaalada macquulka ah ee waxgalka ah ee Isbitaalka waxaa ku jiri doona, laakiin kuma koobna, codsashada xog ku saabsan xaalada caymiska bukaanka, hubinta nooc kasta oo kaydadka caymiska dawlada ama kuwa gaarka loo leeyahay oo la heli karo, raacista xeerarka qarash bixinta ee qarash bixiye kasta oo sadexaad oo la garanaayo, iyo racfaan ka qaadashada codsi la diiday marka adeegga qarashkiisa la bixin karo si guud ama qayb ahaan ayna bixinayso shirkad caymis.

Isbitaalku wuxuu sidoo kale samayn doonaa dadaalo macquul ah oo waxgal ah si loo baaro in qolada sadexaad ee qarashka bixinaysa ay masuul ka noqon karto adeegyada Isbitaalku baxshay, ayna ku jiraan laakiin kuma koobna: (1) xeerka magdhawga mulkiilaha gaariga ama guriga, (2) xeerarka shilka guud ama difaaca guud ee ka hortaga dhaawaca, (3) barnaamijyada magdhawga shaqaalaha, iyo (4) iyo xeerarka caymiska ardayda, iyo kuwo kale. Isbitaalku wuxuu u sheegayaa bukaanka masuuliyada ka saaran inay u sheegaan barnaamijka dawlada ee ku shuqul leh isbadalo kasta oo ku yimaada dakhliga ama caymiska bukaanka. Si

waafaqsan sharciyada gobalka ee arintaan la xariira ama heshiiska caymiska, sheegasho kasta oo dadaalka macquulka ah ee waxtarka Isbitaalku ay keentay dib u soo celinta codsiga biilka daryeelka caafimaadka ee loo diray shirkada caymiska ee gaarka loo leeyahay ama barnaamij dawladeed, Isbitaalku wuxuu soo sheegayaa lacagta uu helay wuxuuna ka jarayaa lacagta ay bixisay shirkada caymiska gaarka loo leeyahay ama barnaamijka dawladu. Haddii Isbitaalku horay u ogaa uuna sharciyan awoodo, wuxuu iskudayi doonaa inuu xaqiijiyo in xaquuqda bukaanka lagu baxsho caymiska qolo sadexaad ee adeegyada lagu baxshay daawaynta shil awgii

D. **Shaacinta Xogta/Bixinta Gunnooyinka:** Bukaanka/wakiilka waxaa laga codsan karaa inuu saxiixo inuu gunnooyinka caymiska lacagta ay bixinayaan qolada sadexaad lagu (tusaale, lacagaha ka yimaada talaabooyinka xad gudubka ah) toos loogu wareejiyo Isbitaalka si uu ugu daboolo adeegyada la baxshay, iyo ogolaansho uu ku aqbalaayo shaacnta xogta muhiimka u ah ku wareejnta gunnooynkaas isbitaalka. Ogolaanshuhu waa inuu sidoo kale cadeeyaa in bukaanka/wakiilku uu dhaqaale ahaan masuul ka yahay qarashaadka aan lagu daboolin gunnooyinka isbitaalka lagu wareejiyay.

E. **Xaqiijinta Masuuliyada Qarashka Adeegyada aan ku jirin Caawimaada:** Marka xog ay doonayso shirkada caymiska ee bukaanku an la keenin kahor adeegga, bukaanka/wakiilka ayaa laga codsan doonaa inuu saxiixo bayaan xaqiijinaaya in asaga ama ayada loo sheegay maqnaanshaha ogolaanshaha loo baahan yahay una sheegaaya masuuliyada dhaqaale ee ka saaran adeegyada ugu danbayn la go'aansho inay yihiin kuwo aan caymisku daboolayn.

VII. Qarash bixinta

Si guud, qarashka oo buuxa ayaa la doonayaa marka isbitaalku soo gudbiyo codsiga Biilka.

A. Koontada lacag shubida

1. **Adeegyada Degdega ah:** Isbitaalku kama dooni doono bukaanka ama wakiilka inuu lacag kahor daawayn baxsho taasoo shardi looga dhigaayo inuu helo daryeelka degdega ah, ayadoon laga eegayn awooda qarash bixinta ee bukaanka ama wakiilka.
2. **Adeegyada Aaan Degdega ahayn:** Isbitaalka ayaa u baahan kara in bukaanku lacag hormaris ah baxsho intaan la siin adeegyada aan degdega ahayn ee bukaan jiifka ama bukaan socodka (ama wakiilka bukaanka) lagana qaadaayo bukaanka aan haysan caymis caafimaad oo ku filan adeegga la siinaayo, aan ka reebanyn in laga qaado talaabooyinka qarash aruurinta, aana heshiis Qorsheh Qarash Bixin La galin Isbitaalka.
3. **Adeegyada Gaarka ah ee Bukaannada U qalma Health Safety Net:** Ma jiro bukaan loo aqoonsaday inuu ahay Bukaan Danyar Ah oo laga qaadaayo lacag hormaris ah. Bukaanka/wakiilka loo aqoonsaday inuu yahay Bukaan Danyar Ah ee laga doonaayo inuu baxsho lacagta caymiska ayaa laga codsan karaa inuu baxsho hormaris ahaan 20% cadadka lacageed ee caymiska looga goosanaayo oo dhan ilaa $500. Bukaanka/wakiilka u qalma caawimaada Dhibaatada Caafimaadka ayaa laga codsan karaa inuu baxsho lacag hormaris ah oo dhan 20% cadadka uu ku daraayo caawimaada Dhibaatada Caafimaadka oo dhan ilaa $1000. Dhammaan baaqiyada soo hara ayaa la marsiinayaa shuruudaha qorshaha qarash bixinta ee cad101 CMR 613.08

B. **Qiima dhimisyada:** Qiimo dhimisyada lagu sameeyocadadka bukaanka laga rabo ayaan u qalmin loomana gudbin doono caawimaada Health Safety Net. Isbitaalka ayaa bixinaaya qiimo dhimisyo dhan ilaa 40% qarashaadka lagu yeesho dadka aan caymiska lahayn, ayadoo ku xiran jadwalka qarash bixinta.

Qiimo dhimisyada ayaa lagu heli karin qaybta lacagta uu bixinaayo bukaanku iyo lacagaha uu caymisku goosanaayo. Xeerarka Qiimo Dhimista ee Isbitaalka waxaa gacanta ku haya Madaxa Waaxda Dhaqaalaha.

C. **Qorshayaasha Qarash Bixinta:** Marka bukaanku/wakiilku usan bixin karin qaybta ugasoo aada bilka Isbitaalka loona aqoonsado inuusan u qalmin Health Safety Net ama barnaamijyada kale ee dawlada ee caawimaada baxsha, Isbitaalka ayaa siin kara bukaanka/wakiilka heshiis qarash bixineed oo uu muddo si tartiib ah iskaga bixinaayo.

Isbitaalka ayaa siinaaya bukaannada lagu leeyahay baaqiga $1,000 ama ka yar, kadib marka laga jaro lacagtii ay hormariska u baxsheen, ugu yaraan hal sano oo qorshe uu lacagta tartiib iskaga bixinaayo uuna dhiibaayo wax aan ka badnayn $25 markiiba. Bukaannada lagu leeyahay baaqi ka badan $1,000, kadib marka laga jaro lacagtii hormariska ahayd, waxaa la siin doonaa qorshe qarash bixin oon lahayn dulsaar kaasoo soconaaya ugu yaraan laba sano. Mararka ay yimaadaan xaalado aan caadi ahayn, codsiyada qorshayaasha lacag bixinta ee ka badan laba sano ayaa la siin karaa qofka ayadoo lagu salaynaayo qof ba xaaladiisa. Isbitaalku kama doonaayo wax qorshe lacag bixin ah bukaanada sida buuxda looga reebay in laga qaado talaabo lacag qaadista sida ku cad xeerka Daynta iyo Lacag Aruurinta.

Isbitaalka iyo xarumihiisa ruqsada leh ee sataleetka, ayna ku jiraan Martha Eliot Health Center, ma siiyaan qorshayaasha lacag bixinta ee lacagta caymisku goosanaayo bukaannada u qal Health Safety Net – Qayb ahaan.

D. **Awooda Ansixinta Wax ka badalka Koontada:** Isbadalada maamulka ee lagu sameeyo cadadka lacagaha iyo lacagaha loo celinaayo bukaannada/wakiilada ama qarash bixiyaasha kale ee cadadyada hoos lagu sheegay ah ayay fasixi karaan shaqsiyaadka hoos lagu sheegay:

1. Lacag dhan ilaa $1000: Kormeeraha, Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka
2. Lacag dhan ilaa $10,000: Maareeyaha, Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka
3. Lacag dhan ilaa $50,000: Agaasimaha, Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka
4. $50,000 ama kabadan: Madaxa Waaxda Dhaqaalaha

VIII. Dalabka biilka, Talaabooyinka Lacag Qaadista iyo Go'aaminta Daynta Xumaatay

Isbitaalku wuxuu marsiinayaa isla dadaalada dalbashada qarashka iyo aruurintiisa dhammaan koontooyinka bukaannada aan caymiska lahayn si lamid ah sida loogu sameeyo koontooyinka qayb kasta oo bukaanka kamid ah.

A. **Go'aaminada Adeeggyada Bukaanku u Qalmo.** isbitaalku wuxuu raacayaa xeerarka iyo tilmaamaha ay soo saartay Commonwealth of Massachusetts ee maamulka u qalmida sheegashada qarashka oo ay bixinayso Health Safety Net iyo barnaamijyada kale ee baxsha caawimaada dawlada.

Isbitaalku wuxuu raacayaa shuruudaha quseeya ee qarash dalbashada, ayna ku jiraan sharciyada Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha (Department of Public Health) (105 CMR 130.332) ee la xariira adeegyada aan qarash lahayn ee gaarka ah ama dib isbitaal u dhigsita ee Isbitaalku aaminsan yahay inay ka dhasheen Dhacdo Daran oo Lasoo Gudbin karo (Serious Reportable Event, SRE). Shilalka SRE ee aan ka dhicin Isbitaalka kuma jiraan go'aamintaan aan lacagta lagu qaadayn. Isbitaalku sidoo kale kama dalbanaayo lacag Bukaan Danyar Ah ee loo aqoonsado inuu u qalmo barnaamijka Health Safety Net ee codsiyadiisa horay uu u diiday barnaamijka caymisku sabab la xariirta cilad dhanka maamulka oo lagu sameeyay dalbashada biilka uuna sameeyay Isbitaalku. Isbitaalku wuxuu kaloo haynayaa dhammaan xogta si wafaqsan sharciyada federaalka iyo gobalka ee ku aadan sirta, amaanka iyo tuugada Aqoonsiga.

B. **Bukaanada/Masuuliyiinta bukaanka ee Laga Reebay in Laga Aruursho Qarashka:** Isbitaalku qarash kama dalbado ama haddii kale kama qaado talaabo lacag aruurin bukaan kasta oo la xaqiijiyo inuu yahay qof:

1. Ka diiwaan gashan MassHealth, gunnooyin ka hela Barnaamijka Gurmadka Degdega ah ee la siiyo Duqoowda, Naafada iyo Carruurta (Emergency Aid to the Elderly, Disabled and Children program), ama qayb ka ah barnaamijka Healthy Start (marka laga reebo in Isbitaalku uu ka dalban karo bukaannadaas qarashaadka ay qaybta ka bixin lahaayeen iyo lacagaha caymisku jaranaayo ee qasabka ku ah barnaamijyadaan caawimaada). Isbitaalka ayaa lacag ka dalban kara bukaanada sheegaaya inuu katirsan yahay wax kamid ah barnaamijyadaan laakiin ku fashilma inuu keeno cadaynta ka qaybgalka noocaas; marka uu helo cadayntaas (ayna ku jirto helitaanka ama cadaynta codsiga saxiixan), Isbitaalku wuxuu joojin doonaa shaqooyinka lacag aruurinta.
2. Ka qaybgalaha Caymiska Amaanka Caafimaadka ee Carruurta (Children's Medical Security Plan, CMSP) oo dakhliga qoyskiisu uu u dhigmo ka yaryahay 400% Tilmaamaha Dakhliga ee Heerka Fakhriga Federaalka. Isbitaalka ayaa lacag ka dalban kara bukaanada sheegaaya inuu katirsan yahay CMSP laakiin ku fashilma inuu keeno cadaynta ka qaybgalka noocaas; marka uu helo cadayntaas (ayna ku jirto helitaanka ama cadaynta codsiga saxiixan), Isbitaalku wuxuu joojin doonaa shaqooyinka lacag aruurinta.
3. Bukaan Danyar Ah waxaa ka reeban in laga qaado talaabada qarash aruurinta kadib marka la siiyo Adeeg Kasta oo uu helay intii lagu jiray mudada loo aqoonsaday bukaanka inuu yahay Bukaan Danyar Ah (marka laga reebo lacagaha qaybta uu bixin lahaa iyo lacagaha caymisku jaranaayo ee la xariira Adeegyadaas uu u Qalmo). Isbitaalku wuxuu sii wadi karaa inuu ka dalbado Qarashka Adeegyada ay U qalmaan Bukaan Danyar Ah ee la siiyay kahor intaan la go'aamin inay yihiin Bukaan Danyar Ah, laakiin kaliya kadib marka aqoonsigaan Bukaan Danyar Ah uu dhacay ama haddii kale la joojiyay.
4. Bukaan Danyar Ah oo hela dakhliga qoyska oo u dhaxeeya 201-400% heerka FPL ayaa ka reeban in laga qaado talaabada lacag aruurinta ee qaybta biilka ka bata lacagta caymisku ka jaranaayo waxaana laga qaadi karaa qarashka lacagaha qaybtu kusoo aado iyo lacagaha caymisku goosto ee ku cad sharciyada gobalka.
5. Bukaan ama qoys u qalma Dhibaatada Caafimaadka, marka laga eego cadadka biilka oo kabadan cadadka lagu siiyo caawimaada Dhibaatada Caafimaadka sida lagu xisaabshay xeerarka arintaan quseeya). Haddii codsiga lacageed ee horay loo codsaday inuu yahay Dayn Xumatay oo Degdeg ah uu noqdo mid u qalma qarashka lagu baxsho Dhibaatada Caafimaadka ee haayada Health Safety Net, Isbitaalku wuxuu joojin doonaa talaabada qarash aruurinta ee ku aadan adeegyadaas la siiyay bukaanka.

Bukaan Danyar Ah lagama dhaafaayo talaabooyinka lacag aruurinta ee adeegyada aan ka ahayn Adeegyada U qalma ee lagu baxshay codsiga bukaanka ama wakiilka kuwaaso bukaanka ama wakiilku aqbalay inuu masuul ka yahay qarashka. Isbitaalku waa inuu helaa ogolaanshaha qoran ee bukaanka ama wakiilka si looga qaado qarashka adeegyadaas.

C. **Dalabka Hore ee biilka:** Marka laga reebo bukaannada laga dhaafay talaabada qarash aruurinta sida kor lagu sheegay, Isbitaalku wuxuu biilka hore u gudbinayaa bukaanka/wakiilka ama qolada sadexaad ee la sheegay inay qarashka dhiibayso. Qaybta lacagta ee uu masuulka ka yahay bukaanku/wakiilku taasoo qarashkeeda laga qaadi doono bukaanka/wakiil ayaa laga reebayaa cadadka ku jira lacagta ay daboolayso Health Safety Net iyo cadadka ka badan qaybta ugasoo aada bukaanka Dhibaatada Caafimaadka, sida ku haboon.

D. **Dabagalka Shaqada Dayn Aruurinta:** Isbitaalku wuxuu adeegsanaayaa wakaalado madax banaan si ay u fuliyaan shaqada dayn aruurinta ee lacagaha bukaanku iska dhiibayaan, wuxuu waafajinayaa wakaalad kasta oo noocaas ah xeerarka ku cad Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka ee Isbitaalka uga dagsan talaabooyinka qarash aruurinta ee ka bilaabanaaya waqti ilaa waqti kale, kuwaasoo ay tahay inay waafaqsanaadaan Xeerka Daynta iyo Lacag Aruurinta. Shaqsiyaadka ayagu iska dhiibaaya qarashka ayaa la waafajin doonaa shaqada lacag aruurinta ee joogtada ah waxayna helayaan ugu yaraan sadex talaabo oo qarash aruurin ah. Talaabooyinka qarash aruurinta ee uu Isbitaalka qaadaayo ama wakiilkiisu qaadaayo waxaa ku jiri kara, laakiin kuma xadidna, arimaha soo socda:

1. Dalabka Hore ee biilka
2. Bayaanada (oo la diraayo 30 maalmood ba mar kadib marka la go'aansho in qofku masuul ka yahay bixinta qarashkiisa)
3. Waraaq dabagal ah (oo lagu diraayo boostada heerka koobaad ama boosto sharciyaysan)
4. Wicitaanada taleefanka
5. Kullanada lala qaadanaayo wakiilka ama cidda kale ee qarashka bixinaysa

E. **Boostada Lasoo Ceshahay:** Koontooyinka boostadooda lasoo cesho ayaa la baari doonaa si loo raadsho bukaanka iyo/ama wakiilka. Dadaalada lagu raadinaayo guriga uu hadda dagan yahay bukaanka waxaa ku jiri doona: ugu yaraan:

1. In dib loo fiirsho dhammaan diiwaannada la hayo iyo balamaha si loo go'aansho in guriga ugu danbeeyay ee bukaanka uu dukumiintiyada ku jiro;
2. In lala xariiro qaraabo ama saaxibo kasta oo la garanaayo; iyo
3. In la fiirsho diiwaankiisa taleefanka ee hadda.

Isbitaalka ayaa la xariiri kara wakaalado isbitaalka ka baxsan si loo qaado talaabooyin dheeraad ah oo lagu raadinaayo bukaanka. Dukumiintiyada dadaalada lagu raadinaayo cidda masuulka ah bixinta qarashka ayaa la kaydinayaa.

F. **Dalaafka Dhaqaale:** Marka la helo ogaysiiska sharci ee dalaafka dhaqaale ee bukaanka/wakiilka, dhammaan shaqada qarash aruurinta ayaa la joojinayaa koontadana isbadal ayaa lagu samaynayaa. Kiisaska dalaafka dhaqaale ayaan u qalmin loona gudbin doonin caawimaada Health Safety Net.

G. **Go'aaminta Daynta Xumaatay:** Kadib markay fashilmaan dadaalada qarash aruurinta ee macquulka ah inay soo xareeyaan lacagta qarashaadka bukaanka lagu leeyahay, baaqiga lagu leeyahay qofka ayaa loo aqoonsan karaa dayn xumaatay si waafaqsan xeerkaan Daynta iyo Lacag Aruurinta iyo xeerar kasta oo quseeya waaxda dhaqaalaha (taasoo aan noqon doonin mid kasoo horjeeda Xeerkaan Daynta iyo, Lacag Aruurinta).

Shuruudaha Go'aaminta Daynta Xumaatay ee Degdega ah: Marka la helo xogta si koonto loogu aqoonsado dayn xumaatay waqti ka mid ah inta lagu jiro shaqada raadinta daynta, koontada ayaa si degdeg ah loogu aqoonsan karaa dayn xumaatay ayadoon la qaadin wax talaabo lacag aruurin dheeraad ah. Waxaa qaybtaan ku jira arimaha soo socda:

1. Iskuday aan lagu guulaysan oo lagu aqoonsanaayo sababta keentay in boostada lasoo celiyay ee aan gaarin qofkii loo diray ay u gaari wayday qofkii loo diray. Koontooyinka aan boostadu gaari karin ama "ciwaankoodu qaldan yahay" ayaa loo aqoonsanayaa dabagal uu samaynaayo shaqaalaha boostada oo ka tisan Shaqaalaha Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka waxaana la baarayaa ciwaanka/xariirka saxda ah kahor intaan koontada la galin aqoonsiga dayn xumaatay. Talaabooyinka daba galka ah ayaa la qorayaa.
2. Iskuday guul daraystay oo lagu raadinaayay nambarka taleefanka ee shaqaynaaya kadib markii uu khadka ka baxay taleefanka bukaanka/wakiilka.

3. Ogaysiiska qoraalka ah ama hadalka ah ee ah inuusan bukaanku/wakiilku doonayn ama diidaayo dhiibista qarashka.
4. Helitaanka ogaysiiska rasmiga ah ee shirkada caymiska ay ku shegayso in gunnooyinka la siiyay qofka caymislaha ah, lana sameeyay ugu yaraan hal iskuday laga sameeyay sidii loola xariiri lahaa bukaanka/wakiilka kadib markii xogtaas laga helay shirkada caymiska.

H. **Adeegyada Ka dalbashada Biilka Daynta Xumaatay ee degdega ah Health Safety Net:** Marka lagu daro talaabooyinka soo socda ee aruurinta daynta ee kor lagu xusay, Isbitaalku wuxuu waraaq u dirayaa bukaan kasta (marka laga reebo bukaannada ogaysiisyadood noqdeen "kuwa aan la helin" ama "ciwaanka gurigu khaldan yahay") oo lagu leeyahay baaqi ka badan $1,000 ee adeegyada degdega ah iyo kuwa la xariira kahor intaan biilka adeegga laga codsan Health Safety Net. Baaqiga lacagta waxaa laga codsanayaa Health Safety Net kaliya kadib marka uu baaqigu jiray asagoon la bixin wax ka badan 120 maalmood laga bilaabo markii la diray ogaysiiskii hore ee biilka, talaabooyinka lacag qaadista oo macquulka ah ee la qaaday intii lagu jiray mudadaasna waxaa lagu qorayaa diiwaanka dhaqaalaha ee bukaanka. Markay yihiin adeegyo la siiyay bukaan aan caymis lahayn, shaqaalaha Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka ayaa ka xaqiijinaaya nidaamka EVS ee MassHealth iyo/ama Kaydka Oonleenka ah in bukaanku uu ama u qalmin ama uusan codsan MassHealth iyo in bukaanku uusan ahayn Bukaan Danyar Ah:-.

I. **Shuruuda Ogolaanshaha Daynta Xumaatay:** Ogolaanshaha koonto gaar ah loogu aqoonsanaayo dayn xumaatay ayaa kala duwan ayadoo lagu salaynaayo cadadka qarashaadka koontada lagu leeyahay, sida soo socota:

1. Lacag dhan ilaa $5000: Kormeeraha, Adeegga Macaamiisha/Dadka Iskood iskaga Dhiibaaya Qarashka
2. Lacag dhan ilaa $10,000: Maareeyaha, Adeegga Macaamiisha/Dadka Iskood iskaga Dhiibaaya Qarashka
3. Lacag dhan ilaa $50,000: Agaasimaha, Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka
4. $50,000 ama kabadan: Madaxa Waaxda Dhaqaalaha

J. **Dadaalada Dayn Aruurinta ee aan Caadiga ahayn iyo Fulinta Sharciga ah:** Caadiyan, Isbitaalku ma qaadaayo "talaabooyinka aan caadiga ahayn ee dayn aruurinta." Talaabooyinka aan caadiga ahayn ee dayn aruurinta waxaa ku jira in daynta laga gado adeeg bixiye kale, in xog xun oo qofka ku saabsan loo gudbiyo wakaalada soo gudbisa hufnaanta daynta ee dadka ama laanta daynta, dib u dhigista ama ka diidista, ama ku qasbida inuu qarashka baxsho kahor intaan loo fidin, daryeel caafimaad ahaan muhiim ah sabab la xariirta inaan bukaanku bixin mid ama ka badan oo kamid ah biilalka daryeelka mar hore la siyay sida ku cad xeerka Caawimaada Dahqaalaha ee Isbitaalka, damaanad u qaadashada ama la wareegida guriga uu dagan yahay qofku ama gaarigiisa shaqsiga ah, jarashada mushaaraadkiisa, iyo/ama gudbinta dacwad madaniga ah oo qofka ka dhan ah. Go'aan kasta oo lagu fulinaayo talaabooyinka aan caadiga ahayn ee dayn aruurinta ayaa u baahan inay u codeeyaan Gudigga Agaasimayaashu. isbitaalak iyo wakiiladiisa waxaa laga doonayaa inay u muujiyaan Gudigga Agaasimayaasha dadaalada macquulka ah ee la sameeyay si loo go'aansho u qalmida bukaanka caawimaad sida ku cad Xeerka Caawimaada dhaqaalaha kahor intaysan ku talin in la qaado talaabooyinka aan caadiga ahayn ee dayn aruurinta. Talaabooyinka aan Caadiga ahayn ee Dayn Aruurinta lama bilaabaabo ilaa laga gaaro ugu yaraan 120 maalmood laga bilaabo taariikhda Isbitaalku siiyay dalabka biilka koobaad kadib marka isbitaalka laga saaro bukaanka, wuxuuna u baahan yahay muujinta ogaysiiska qoraalka ah ee loo diray bukaanka kuna saabsan helitaanka caawimaad dhaqaale ugu yaraan 30 maalmood kahor intaan talaabada la qaadin. Ogaysiiska qoran ayaa sidoo kale u baahan inuu muujiyo shaqada aan caadiga ahayn ee dayn aruutinta ee Isbitaalku doonaayo inuu bilaabo, iyo sidoo kale taariikhda shaqadaasi bilaabanayso. Marka la samaynaayo talaabada aan caadiga ahayn ee aruurinta

daynta, Isbitaalku wuxuu joojinayaa dhammaan talaabooyinka haddii uu soo gaaro Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha si loo siiyo muddo lagu fiirsho oon ka badnayn 30 maalmood.

Kahor intuusan dalban fulinta sharciga, Isbitaalka iyo wakiladiisu waa inay sameeyaan dadaalada macquulka ah si loo go'aansho u qalmida bukaanka ee caawimaada sida ku cad Xeerkiisa Caawimaada Dhaqaalaha. Dadalaka macquulka ah waa inay ku jirtaa ogaysis qorala ah oo cadaynaya helitaanka caawimaad dhaqaale kaasoo ay la socoto mudada kama danbaysta ah taasoo kadib talaabada sharciga ah la bilaabi karo. Jadwalka la sheegay waa inuusan ka badnayn 30 maalmood kadib ogaysiiska. Fulinta sharciga lama bilaabi doono ilaa ugu yaraan 120 maalmood laga joogo taariikhda Isbitaalku bixinaayo bayaanka koobaad ee dalabka biilka kadib marka bukaanku isbitaalka ka baxay.

K. **Dukumiintiyada:** Isbitaalku wuxuu qorayaa shaqada la xariirta cadaynta iyo sheegida koonto loo aqoonsaday dayn xumaatay. Maadaama Isbitaalku leeyahay nidaam "kum buyuutar ku shaqeeya" oo lagu hayo xogta bukaan jifka iyo bukaan socodka, qorista shaqada adeegyadaan waxaa lagu hayn karaa nidaamka kumbuyuujtarka ayagoo qoraal isku dhafan ah halkii ay ka ahaan lahaayeen waraaqo.

L. **Shilalka Gaariyaasha:** Isbitaalku wuxuu gudbinayaa sheegashada qarashka Adeegyada U qalma ee la siiyay Bukaan Danyar Ah oo ku dhaawacmay shil gaari kaliya haddii (1) uu baaray in bukaanka, darawalka, iyo/ama mulkiilaha gaarigu uu leeyahay caymiska magdhawga; (2) uu sameeyay dadaal kasta oo uu ku helaayo xogta qarash bixiye kasta oo sadexaad; (3) uu hayo cadaynta dadalaadaas, ayna ku jiraan qorista wicitaannada taleefanka iyo waraaqaha loo diray bukaanka; iyo (2|) marka la heli karo, uu si dhab ah u gudbiyay dalabka qarashka uuna u dray shirkada caymiska magdhawga gaariga. Markay timaado shilalka gaariyaasha iyo dhammaan soo kabista la xarirta qarashaadka horay looga dalbaday Health Safety Net, Isbitaalku wuxuu soo sheegayaa lacag kasta oo uu soo ceshtay wuxuuna u sheegayaa Xafiiska Health Safety Net. lacagta la helo ayaa laga jar doonaa lacagta lagu dalbaday Adeegyada Bukaanku U qalmo.

IX. Xaquuqaha iyo Waajibaadka saaran Bukaanka:

A. Isbitaalku waa inuu u sheegaa bukaannada xaqa ay u leeyihiin:
   1. Inay codsadaan MassHealth, Commonwealth Care, go'aaminta Bukaan Danyar Ah iyo Dhibaatada Caafimaadka; iyo
   2. Qorshe qarash bixin, sida ku cad Xeerkaan Daynta iyo Qarash Aruurinta iyo sharciyada la xariira, haddii bukaanka loo aqoonsado Bukaan Danyar Ah ama uu u qalmo caawimaada Dhibaatada Caafimaadka.

B. Bukaanka hela Adeegyada uu Uqalmo waa inuu:
   1. Keenaa dhammaan dukumiintiyad alaga doonaayo;
   2. Uu u sheegaa MassHealth isbadalo kasta oo ku yimaada dakhliyada qoyska ama xaalada caymiska, ayna ku jiraan laakiin aan ku koobnayn dakhliga, dhaxalka, hadiyadaha, deeqahah haayadaha, helitaanka caymis caafimaadka iyo magdhawga qolo sadexaad. Bukaanku wuxuu, taas badalkeed, keeni karaa ogaysiiskaas isbitaalka; iyo
   3. Wuxuu la socon karaa lacagaha laga jaranaayo bukaanka wuxuuna u keeni karaa isbitaalka dukumiintiyada cadaynaaya in lacagihii laga jari lahaa uu buuxshay marka wax ka badan hal qof oo qoyska ah

loo aqoonsado Bukaan Danyar Ah ama haddii bukaanka ama xubnaha qoysku helaan Adeegyada U qalma kana helaan wax ka badan hal dhakhtar; iyo

4. Inuu u sheego Waaxda Xeerka iyo Dhaqaalaha Daryeelka Caafimaadka ama MassHealth marka bukaanku galo shil, ama uu la ildaran yahay xanuun ama dhaawac, ama khasaaro keeni kara dacwad maxkamadeed ama sheegasho caymis. Bukaanku waa inuu:

a. Gudbiyaa sheegashada magdhawga;

b. Uu aqbalaa inuu raaco dhammaan shuruudaha M.G.L. ch. 118G, oo ay ku jiraan laakiin aan ku koobnayn:

(1) siinta Waaxda fasax ay ku raadiso cadadka lacagta u dhiganta qarashka Health Safety Net ee laga helo dacwadaha sheegasho kasta ama dacwad kasta oo ka dhan ah qolo sadexaad.

(2) xog ka bixinta sheegashada ama dacwad kasta oo kale, uuna si buuxda ula shaqeeyo Waaxda ama qandaraaslaheeda, ilaa in Waaxdu go'aamiso maahee inaan wada shaqayntu ahayn maslaxada koobaad, ama keenayso dhibaato wayn ama naafo xun, oo ku dhacda bukaanka;

(3) u sheegida Waaxda ama MassHealth si qoraal ah 10 maalmood gudahood gudbinta sheegasho kasta, dacwad madani ah, ama dacwad kale; iyo

(4) dib u bixinta lacagta Health Safety Net kadib markuu lacag ka helo qolo sadexaad ee dhammaan adeegyada u qalma Health Safety Net ee la baxshay waqtiga ama kadib shilka ama dhacdada kale kadib markuu noqday Badbaadada bulshad sababo la xariira qarashka Health Safety Net, kaliya qarashka Health Safety Net ee lagu baxshay shilka ama dhacdada kale ayaa dib loo dhiibayaa.

c. Waaxdu waxay kaliya soo ceshanaysaa cadadka lacagta sida tooska ah looga qaaday bukaanka heerka marka bukaanku lacagta ka helo qolo sadexaad oo bixinaysa qarashka daryeelka caafimaadka ee ay bixisay lacagtiisa Health Safety Net ama heerka ku cad sharciga 101 CMR 613.06(5)